

Miyaad u Baahan tahay Shatiga TV-ga?

Maxaad ugu baahan tahay Laysanka TV-ga?

Waxaa lagaaga baahan yahay in aad leedahay Shatiga TV'ga iyadoo aan la eegeyn qalabka aad isticmaasho si aad u daawato ama u duubto barnaamijyada telefishinka marka laga soo deynayo TV'ga. Tan waxaa ka mid ah TV'yada, kombiyuutarada, telefoonada gacanta, ciyaaraha consoles'ka, sanduuqyada digital'ka ah iyio duubayaasha DVD/VHS.

Mase ogtahay in haddii lagu qabto adigoo daawanaya telefishin adigoo haysan Shatiga TV-ga maxkamad lagu kaxayn karo laguguna ganaaxi karo ilaa iyo £1,000?

Sidaa darteed haddii aad daawato ama duubto TV, waxa aad u baahan tahay in aad iibsato shati hadda. Fadlan eeg "Sidee loo gataa shati" hoos ka eeg iyadoo habab badan oo loo bixiyo ah.

Daawashada barnaamijyada satellite'ka aan UK aheyn kaliya?

Waxaad u baahan doontaa Ruqso TV xatta haddaad kaliya oo qabsato ama duubato barnaamijyo laga soo daayo UK dibeddeeda.

Lacagta ma u bixin laheyd qaybqayb todobaadle ah?

Haddii aad jeclaan laheyd in aad u bixisid lacagta laysanka TV-gaaga si todobaadle ah, waxaad u bixin kartaa nidaamka qayb-qayb u bixinta oo u yar sida £5.60 adigoo ku bixinayo kaarka lacag bixinta layskanka TV'ga. fadlan wac 0300 555 3456.

Mar dhow miyaad guri ka guurtay?

Haddii aad mar dhow guri cusub u guurtay aadna shatti ku leedahay cinwaankaagii hore, fadlan inoo sheeg adigoo booqanayo barteenka internetka www.tvlicensing.co.uk/moving ama adigoo wacayo 0300 790 6044.

Sicir dhimis ma heli kartaa?

Ma tahay, ama qof kula nool ma yahay:

- **75 sano jir ama ka weyn?** Waxaa laga yaabaa in aad u qalanto Shati TV oo bilaash ah. Si aad u codsato, si sahlan u gal qadka online'ka ama naga soo wac hadda halkan 0300 790 6044.
- **74 sano jir?** Waxa aad codsan kartaa Shati TV oo waqti gaaban ah si uu baahidaada u daboolo ilaa aad u dabaaldegeyso sanadguurada dhalashadaada 75'aad.
- **Indhoole ama qof indhaha aad wax uga qabo?** Waxaa laga yaabaa in aad u qalanto 50% sicir dhimis ah. Si aad u codsato, aad qadka online'ka ama boost ku soo dir nuqul ah dukumiintigaaga diiwaangelinta indha la'aanta – ama shahaado ka timid dhaqtarkaaga indhaha – oo uu la socdo lambarkashatigaaga, lambarka telefoonkaaga iyo jeeg lacag bixin ah oo ku socoto TV Licensing, Blind Concession Group, Bristol BS98 1TL.

Shati uma baahnid miyaa?

Haddii aadan daawan ama duubin barnaamijyada telefishinka marka laga soo daayo TV'ga – haddey tahay TV, kombiyuutar, telefoonka gacanta, ciyaaraha console'ka, sanduuqa digital'ka, duubayaasha DVD/VHS ama qalab kasta oo kale – uma baahnid Shati TV. Fadlan inoogu sheeg halkan www.tvlicensing.co.uk/noTV ama halkan 0300 790 6044.

Sida loo iibsado shatiga.

Shatiga TV midab leh wuxuu waqtigan la joogo ku kacayaa £145.50 (£49.00 waxaa loogu talagalay shati telefishan madow iyo caddaan). Waxaa jira habab fara badan oo loo bixiyo – dooro oo keliya midka adiga sida ugu wanaagsan kuugu cuntama:



Khadka shidan. Waxaad ku bixin kartaa khadka shidan ee www.tvlicensing.co.uk waxaad u baahan doontaa inaad gacanta ku haysatid kaarkaaga deynta ama kaarkaaga lacag shubidda.



Debit'ka tooska ah oo ka imaanayo koontadaada bangiga ahaan. Waxa aad u bixin kartaa bishiiba mar, afartii biloodba mar ama sanadkiiba mar. Si aad ugu bixiso Debit'ka Tooska ah booqo www.tvlicensing.co.uk/dd ama naga soo wac halkan 0300 790 6044 adigoo wato faahfaahinta bangigaaga.



Adigoo isticmaalaya kaarka deynta. Si aad ugu bixisid kaarka deynta/amaahda sida Maestro, Delta, Solo, Visa, Visa Electron ama MasterCard, wac 0300 790 6044. Fadlan diyaar la ahow faah faahinta kaarkaaga markaad soo wacaysid.



Meel kasto oo ah PayPoint dukaan. Waxaad ku bixin kartaa Laysanka TV-ga midabka leh kaash ahaan ama kaarka debit-ka ahaan.



Adigoo isticmaalaya boostada. Soo dir jeeg lacagtiisa la siin karo 'TV Licensing'. Ku qor magacaaga, cinwaankaaga iyo summadda boostada dhinaca danbe ka dibna u soo dir: TV Licensing, Bristol BS98 1TL. Fadlan lacag caddaan ah ha soo dirin.

Haddii aad wax su'aalo ah qabto ama aad u baahan tahay gacansiin la xiriirto warqaddan, fadlan wac 0300 790 6044.



Haddii aad qabto dhibaato xagga aragga ah, waxa aad macluumaadkan ku heli kartaa email ahaan ama Luuqadda indhoolayaasha, daabacaad weyn ama cajalad dhegeysi adigoo wacayo 0300 790 6076. Xattaa, adeegga Minicom'ka oo loogu talo galay dhagoolayaasha ama dadka uu maqalku ku adag yahay ayaa waxaa laga helayaa halkan 0300 790 6050.

Fadlan waxaad ogaataa in kaarka keydka Laysanka TV-ga hadda lagu bedelay istaanbada keydka Laysanka TV-ga. Wixii warar dheeraad ah fadlan wac 0300 555 0282.